Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**WARQAD KU SOCOTA XUBNAHA JAALIYADDA SOOMAALIYED (No. 9)**

**Nairobi, 31 Disembar 2008**

**As-salaamu Aleykum**

**Saaxibayaal,**

Isbeddelada dhacdooyinka way socodaan ayadoo aan la diidi Karin. Waxaan sheegi karaa in dhacdooyinkaas ay kordheen, inta ka dambeysay warqaddii aan idiin soo qorey 2dii Diseembar. Ayadoo bishii la soo dhaafay la arkey dhacdooyin aan horey loo arag ilama 1990dii, taas oo ku aadan indha-kuheynta Bulshada Caalamku ay indhaha ku haayaan xaaladda Somaaliya, dhacda ugu mihiimsan waxa iscasilga Madaxweyne Abdullah Yusuf Ahmed uu si nabad gely buuda leh uga tegay xafiiska.

Waxaa kale oo aad muhiimadu leh, ku-laaba-shada Hoggaanka Sare ee Isbaheysiga Dib U Xureynta Soomaaliyed "ARS" iyo wufuud ka tirsan Guddiga Wadajirka ee Nabadgelyada ay ku laabteen Muqdishu iyo Beletweyne, waxaa taa la mid ah oggolaashadii Xubnaha Barlamaanka Federaalika Ku-meelgaarka ah ay ansaxiyeen hirgelinta mabaadi'dii wada-shaqeynta siyaasadeed ee ka dhexeysa Dawladda Federaalika Soomaaliyeed iyo Isbaheysiga Dib-uxureynta Soomaaliyed, FTG iyo ARS.

Waxaan qoraala-deydii hore indin ku sheegay in aan doonaayo in la qabto shir wada-tashi ah ee heer wasiir ah ku saabsan arrimaha Burcad badeeda. Shirkaas wuxuu qabsoomay 10-11 Diseembar. Waxaa logu gaaray shirkaas ujeedooyin loogu soo jeedinaayo racyul caalamka in ay dhab ahaantii tahay burcad badeeda ka jir xeebaha Soomaaliya qayb ka mid ah dhibaatada qotada dheer ee ka jirta Soomaaliya. Baaqii ka soo baxay shirkaas wuxuu ifiyey sida ay uga go'antahay Bulshada Caalamka in ay u raadiyaan xal guud dhibaatada Burcad Badeeda, taasoo ku saleysan aragtiyo iyo dhaqadhaaqyo ay ka mideysan yihiin Bulshada Caalamka, tan Gobolka iyo Soomaalidaba, taasoo ka mid tahay dib-u-soo nooleynta bulshada kaluumeysatada Soomaaliyeed. Si kastaba ha ahaatee xalka dhabta ah wuxuu ku jiraa kor u qaadidda nabadda, deggenaashaha iyo dib u heshiin. Ilaa indin ku xal waara u heshaan dhibaatada ka jirta dalkiina, ifafaalaha burcad-badeednimaa waa sii soconaysaa ilaa ay ka gaaraan heer caalami ah. Taasoo siindoonta magac xun Soomaaliya.

16kii Diseembar, aniga oo shir gudoominaaya, Kooxda la Xiriirka Soomaaliya waxay ku kulmeyn New York si ay wada-hadal qoto dheer uga yeeshaan arrimaha siyaasadda, nabadgelyaha iyo Kaalmadaba. Kullamada waxaa ka qayb galay xubno ah saraakiil sare-sare ee Dawladaha oo ka mid tahay, Xoghayaha Arrimmaha Dibedda ee dalka Mareykanka iyo Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Norway. Xubnaha Shirku waxay u arkeen ismaadhaafka ka dhax jira TFG'da mid ka weecinaaya geedi socodka wada-hadalka siyaasadeed, waxaana baaqii ugu dambeeyey uu ugu yeeray dhammaan qeybaha in ay dhinac iska dhigaan khilaafka siyaasadeed, ayna si wadajir ah uga wada- shaqeeyaan maslaxadda guud, helitaan nabad waarta iyo deggenaasho si loo hirgeliyo heshiiskii Jabuuti, dibna loogu bilaabo hawlihii diyaarinta destuurka, sida ku cad Axdiga Fedaraaliga Ku-meelgaarka ah.

Maalmo yar ka dib, shirkii 31aad ee aan caadiga aheyn ayey ay qabteen Golaha Wasiirada ee Dawladaha IGAD si ay ugu wada-hadlaan dhibaatooyin ka siyaasadeed ee ka dhex jira TFG'da iyo wixii ah dhacdooyin dhici- kara ka dib markii ay baxaan ciidammada Ethiopia ee lagu dhawaaqay. Wasiiraddu waxay si cad u sheegeen in ay ka go'antahay in ay talaabooyin qaadaan, taasoo ah cuna-qabateyn lagu soo rogo shaqsiyaadka isku daya in ay carqalateeyaan geedi socodka nabadda Jabuuti. Waxaan hadda noo muuqatay saameynta ay ku yeelatay shaqsiyaad Qaaradda jooga, waxaana aniguna la wadaaga aragtida ah inaan Soomaalidu ka baxsanaan Karin aragtida ka jirta gobolka iyo go'aanada Bulshada Caalamka.

Bixitaanka lagu dhawaaqay ee ciidammada Ethiopia waxay soo dedejisay baahida loo qabo in la helo ciidamo beddela si ay u hantaan nabadgelyada Soomaaliya. 22di Disembar, AU-da waxay qabatay shir Heer Wasiiro ah, kaasoo ahaa kullankii 163aad ee Golaha Nabadda iyo Amaanka si ay uga wada-hadlaan xoojinta AMISOM taas oo si qorsheysan ula talaabo qaadeysa bixitaanka ciidammada Ethiopia. Warqad uu u soo qorey Xubnaha Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay taarikh, 19 Diseember, Xoghaya Guud ee Qarammada Midoobay, wuxuu u soo jeediyey, in si dhaqso ah loo qaado laba arrimood oo muhiim ah, in si buuxa loo taageero xoojinta AMISOM, iyo in la abuuro ciidamo Soomaaliyed ee wadajir ah, si ay uga qeyb qaataan sugidda nabadgelyada, ayadoo aragtida ah in la keeno ciidamo hawlgal-nabad-ilaalineed ee ka socda Qarammada Midoobay ay tahay arrin weli furan.

So cusboo-naashada dareenka Bulshada Caalamka ee ku wajahan Soomaaliya, oo ay ka mid tahay tan Dawladaha Gobolka, kuwaas oo la yimid arragti mideysan oo ku wajahan in ugu dambeyntii dhibaatada Soomaaliya ay ka somaaxatay maq-naashaha hoggaan wax ku ool ah (Dawlad, mucaarid, ganacsato madax diimeydka, Hoggaamada Siyaasadeed iyo kuwa nabadgelyada) oo lagula xisaabtamo mas''uuliyadooda loo idmaday iyo daacad-u-noqosha xal u helida dhibaatada Soomaaliya. Waxaa lagu soo celceliyey in badan, ha ahaato shirarka IGAD, Kooxda la Xariirka Soomaaliya, ama xitaa Golaha Ammaanka ee Qarammada Miboobay in dhab ahaantii dhibaatada Soomaaliya ay tahay dhibaato xagga Hoggaanka, balse aysan ahayn nabadgelyo xumo. Waxaan ku kal soo nahay inaan sameyneyno horumar, kaa soo abuurayo xaalad suura-gelinysa in uu soo baxo hoggaan ay ka go'antahay xaqiijinta nabad waarta iyo xiriir wanaagsan ee dhex mara dawlada deeriska, taasoo fududeynaysa ka mid ahaanshaha Soomaaliya bulshada caalamka si buuxda uga mid noqoto.

Waxaan doonayaa inaan mar kale idiin xasuusiyo in geedi socodka Jabuuti uu oo furay waqti cusub ee taarikhda ee dalkiina. Arrintaas waxay fursad siiday dhammaan Soomaalida si ay markhaati kaga noqdaan jiil cusub ee muhim, kuwaas oo ay ka go'antahay in ay helaan nabad iyo deggenaasho. Fursaam, waxaan jecelahay in aan ku ammaano go'aanka Madaxweyne Abdullahi Yussuf kaga tegayo xilkiisi. 20 sano oo halgan awoodeed ka dib, waxaan noo muuqatay in aysan jirin cid ku guulaysatay halgamadaas, haday tahay xag siyaasadeed, xag dhaqaale iyo mid diimeydba. Taa bedelkeed waxaa jirta in haweynka iyo jiilka cusub ay way-nayaan wax rejo ah ee mustaqbalka. Waxaa yimid waqtigii ay dhammaan madaxda Soomaalida ee leh rabitaan siyaasadeed, mid dhaqaale iyo mid diimeyd, kuwaas oo aan waqtiga hadda ka hor fursad siinin in ay hadda muujiyaan rabitaan iyo ka go'naasho nabada iyo jiritaanka waddankooda. Arrintani waxaa qiri-doonta taarikhda, waxaana loo aqoonsan doona ahlu-sharaf. Madax lala xisaabtamo ee go'aansatay wax ka qabashada dhibaatada dalkooda ayey tahay in la helo haddii Soomaalidu ay doonayso in ay si mideysan u caaweyaan sameynta deggenaasho taasoo oggolaan-doonta in ay bilaabato xaalad deggenaasho.

Waxaa heyna barnaamij rajo weyn leh sanadka 2009. Asbuucyada ugu horeeya dhexdooda, waxay tahay in aan u diyaar-garowno doorashada Madxweyne cusub iyo sameynta dawlad leh Midnimo Qaran iyo Baarlamaan la ballaaran. Ka-hor dhammaadka Bisha Janaayo, waxaan rejo ka qabaa in aan suurta gelino kulan loo qabanayo Bulshada Ganacsatada si ay uga wadahadlaan deggenaashaha iyo dib-u-dhiska dalka. Waxaa kale oo aan qorsheynayaa in aan shir u qabto saraakiishii boliiska iyo militariga ee hore oo aan qeyb ka noqon halganka dagaalkii sokeeyey, si aan isu-weydaarsano aragtida ku aadan kor u dhigidda nabadgeliyada iyo dib u dhiska ciidan Qaran. Waxaa wadaa qorshe aan doonayo in si weyn Jaamacadda Carabta ugu qayb gasho dadaaladan.

Inkastoo uu horumarkaani jiro, waxaa sii socda warbixinno iyo daraasado shaki gelinaaya mustaqbalkiina. Dadkaas waxaad u rejeynaysaan wanaag maadaama ay adagtahay in la fahmo isbeddel. Soomaaliya waxay gelaysaa waqti cusub. Bulshada Caalamka waxay sii waddaa dadaalkii ay ku xaqiijinaysay hababkii iyo waxyaabihii ay ku xaqiijin lahayd deggenaan dalkiina ku soo laabata. Waxaan dhammaantiina idiin ku yeeraaya in aad raacdaan tareenka (train) taarikhda, aadna abaabushaan dhammaan awoodiina si aad u hanataan wadajir ka dhex jirta walaalaha, si aad dib ugu soo ceshetaan sharaftiina, madax-banaanidiina iyo xurmadi Soomaaliya. Allah u bariya in ay dhammaato oraahda ah "failed state" waddan fashilmay, taasoo hadda lala xiriiriyomagaca dalkiina weyn ee qaaliga ah marka la joogo munaasabadaha caalamiga ah.

Saaxibkiina,

Ahmedou Ould-Abdallah